# Bayaanka Asturnaanta ee ACLU of Minnesota

**Dhaqangal ah Luulyo 31, 2025**

American Civil Liberties Union of Minnesota ("Union") iyo American Civil Liberties Union of Minnesota Foundation ("Foundation") (oo wadajir ahaan loo yaqaano, "ACLU of Minnesota," "innaga," "annaga," ama "annaga) shaqaddayada sidii loo ballaarin lahaa xaqa uu qofku u leeyahay asturnaanta, kordhinta xakameynta ay shakhsiyaadku ku leeyihiin xogtooda shaqsiga ah, iyo in la xaqiijiyo in xorriyadaha madaniga ah la wanaajiyo halkii ay wax u dhimi lahaayeen hal-abuurnimada tignoolajiyadeed.

ACLU of Minnesota waxaa ka go'an in ay ku noolaato qiyamkeena iyadoo ku sharxaysa, luuqad la fahmi karo, sida aan u soo ururinno oo u isticmaalno macluumaadkaaga shakhsiyeed iyo annagoo bixineyna xulashooyin cadcad oo ku saabsan sida aan u soo uruurino una isticmaalno macluumaadkaaga shakhsiyeed. Waxaan si joogto ah u qiimeynaa oo aan u wanaajinaa hab-dhaqanadeena asturnaanta iyo maamulidda xogta si aan si xilkasnimo leh u maarayno macluumaadka shakhsi ahaaneed ee nalagu aamminay. Tan waxa ka mid ahaan kara macluumaadka adiga kugu saabsan, haddii aad tahay taageere ACLU of Minnesota iyo haddiiba aadan ahaynba. Waxaan ka soo aruurineynaa macluumaadka adiga kugu saabsan marka aad nala falgasho/xidhiidho waxaana laga yaabaa inaan ka helno macluumaadka adiga kugu saabsan shaqsi ahaan ka xubin ka mid ah shacabka ilo kale haddii aad tahay taageere ACLU of Minnesota iyo haddii aadan ahaynba (tusaale, waxaad tahay codbixiye diiwaan-gashan waxaanan ku haynaa macluumaadka kugu saabsan adiga faylasha codbixiyayaasha ee aan u isticmaalno si aan ugu sameyno wacyigelin codbixiye; cilmi baarista arrimaha xorriyadda madaniga ah, sida, takoorka xuquuqda cod-bixinta; ama si aan u aqoonsanno oo aan si fiican u fahano taageerayaasha ACLU of Minnesota ). Gudaha bayaankan "adiga" waxaa loola jeedaa taageerayaasha ACLU of Minnesota iyo shakhsiyaadka aan hadda lala lahayn xiriir toos ah labadaba.

Bayaankan Asturnaanta ("Bayaan") waxa uu qeexayaa sida ACLU of Minnesota usoo ururiso, u isticmaasho, u wadaagto, ama haddii kale ugu habayso macluumaadka shakhsi ahaaneed hawl-maalmeedkeeda. Qaar ka mid ah barnaamijyada ACLU of Minnesota, iyo sidoo kale "Ururada kale ee ACLU," oo ay ku jiraan American Civil Liberties Union, Inc., the American Civil Liberties Union Foundation, Inc., the ACLU Voter Education Fund (wadajir ahaan loo yaqaano, "National" ama "ACLU"), iyo ururada ACLU ee gobolka/deegaanka/kuwa dhul ahaanta xidhiidhka la leh ee kale ("La-hawlgalayaasha" ACLU) ee Maraykanka oo dhan waxay leeyihiin bayaan asturnaaneed oo mid kasta gooni u ah. Bayaanadaas ayaa laga heli karaa halkan Bayaanada Asturnaanta ah ee Ururada ACLU. ACLU of Minnesota iyo ururada ku xiran waxaa loo tixraaci karaa si gaar ah iyo si wadajir ah "Ururada ACLU." Si aad wax badan uga barato baaxadda Bayaankan, xeerarka lagu dabaqi karo, iyo qeexitaannada muhiimka ah, ka akhri Wax ku Saabsan Bayaankan.

## Qodobbada Ugu Muhiimsan Bayaanka Asturnaanta.

- **Mabaadi'da Qarsoodinimada Xogtayada.** ACLU of Minnesota waxa ka go'an xaqa aad ku leedahay asturnaanta. Waxaan raacnaa siddeedan mabaadi marka aan habeeneyno macluumaadkaaga gaarka ah: Hufnaan, Ka-qaybgalka Shakhsiga, Qeexidda Ujeeddada, Yaraynta Xogta, Xaddidaadda Isticmaalka, Tayada Xogta iyo Daacadnimada, Amniga, iyo La Xisaabtanka. Wax badan baro.
- **Macluumaadka Shakhsiyeed ee Aanu Soo Ururino.** ACLU of Minnesota waxay soo ururisaa oo maamushaa macluumaadka shakhsiyeed ee kugu saabsan iyadoo u mareysa habab kala duwan, oo ay ku jiraan iyada oo *si toos ah kaaga soo ururineysa* (tusaale ahaan, iyada oo loo marayo foomka mareegta oo aad soo gudbiso), iyada oo loo marayo *xog ururin otomaatig ah* (tusaale, iyada oo loo marayo tignoolajiyada si loo fahmo sida dadku u adeegsadaan mareegaheena),

iyadoo *la adeegsanayo ilo dhinac saddexaad ka socda* (tusaale, macluumaadka codbixiyaha ee ka socda dawladda iyo ilaha ganacsiga), iyo *fahamka dadban ee macluumaadka shakhsiyeed ee adiga kugu saabsan* (tusaale, waxaanu eegnaa shakhsiyaadka laga yaabo iney xiiseenayaan iney ku biiraan dacwad dhageysi takoor oo ku saleysan macluumaadka aan kaa soo uruurinay adiga iyo/ama macluumaadka aan ka helnay ilo dhinac saddexaad ah). Wax badan baro.

- **Sababta Aan U Isticmaalno Macluumaadkaaga.** ACLU of Minnesota waxay u isticmaashaa macluumaadkaaga shakhsiyeed si aan u sii horumarino hadafkeena. Si aan si fiican u sharaxno sababta aanu u soo uruurino macluumaadkan, waxaanu liis gareenay ujeedooyin habaysan oo gaar ah oo ay ACLU of Minnesota u isticmaasho macluumaadkaaga, oo lagu kala saaray hawlaha mawduuca ee u-doodista iyo abaabulista; lacag uruurinta; adeegyada sharciga; wacyigelinta iyo cilmi-baarista; ganacsiga; amniga adeegyada, tayaynta, iyo wanaajinta; iyo marka uu sharcigu u baahan yahay, si looga hortago wax isdaba-marinta oo misna loo ilaaliyo xuquuqdeena ama ta kuwa kaleba. Wax badan baro.
- **Ciddee iyo Sidee Ayaanu U Wadaagnaa Macluumaadkaaga.** ACLU of Minnesota waxay la wadaagtaa macluumaadkaaga shakhsi ahaaneed Ururadeena nagu xidhan, bixiyeyaasheena adeegyada ee naga caawiya fulinta hawlaha ganacsiga, la-hawlgalayaasheena ganacsiga, iyo qaybaha kale ee saddexaad sida uu sharcigu u baahan yahay ama u oggol yahay. Wax badan baro.
- **Xulashooyinkaaga iyo Xuquuqdaada.** ACLU of Minnesota waxay bixisaa xulashooyin ku saabsan sida aan u habayno macluumaadkaaga. Waxaad noo sheegi kartaa sida aad rabto inaan kuula soo xidhiidhno, aan u saxno macluumaadkaaga, oo aadna noogu sheegto inaan tirtirno ama joojino u isticmaalka macluumaadkaaga siyaabo gaar ah. Wax badan baro.

# Xogta Shakhsi Ahaaneed ee Aanu Soo Uruurino

ACLU of Minnesota waxay soo ururisaa oo ku maareysaa macluumaadkaaga shakhsiyeed habab kala duwan. Qaybtani waxay qeexaysaa macluumaadka aanu soo uruurino iyo sida aanu u soo uruurino.

## Macluumaadka Aad Nasiiso

Tan waxaa ka mid ah macluumaadka aad si cad tallaabo ugu qaaddo si aad ula wadaagto ACLU of Minnesota. Tani waxay noqon kartaa iyadoo loo maraayo foomamka onlaynka lagu gudbiyo, foomamka lacag deeqidda kuwa isku-diiwaangelinta ikhtiyaariga ah, ama wicitaan taleefan marka aad wacdo ACLU of Minnesota si aad lacag ugu deeqdo ama aad u codsato kaalmada sharciga ee Foundation, tusaale ahaan. Iyadoo loo maraayo hababkan, waxaad wadaagi kartaa qaybahan macluumaad ee soo socda:

- **Diiwaangelinta akoonka.** Tusaale ahaan, magaca isticmaalaha iyo eray sireedka.
- **Maqal ama muuqaal.** Tusaale ahaan, sawirkaaga ama codkaaga la duubo markaad uga qaybgasho dhacdo lasoo xaadiraayo ama looga qeybqaadanayo si fogaan arag ah ama aad nooga tagto fariin cod ah.
- **Goobta Xiriirka.** Tusaale ahaan, cinwaanka iimaylka, cinwaanka boostada, ama lambarka taleefanka.
- **Macluumaadka dadweynaha.** Tusaale ahaan, da'da, xaalka muwaadinimo, qomiyadda/jinsiyadda, nooca galmada, aqoonsiga sinjiga, xaalka guurka ama xiriirada kale, iyo macluumaadka qoyska.
- **Maaliyadda.** Tusaale ahaan, qaddarka aad qorshaynayso inaad ugu dardaaranto in la siiyo ACLU of Minnesota.
- **Caafimaadka.** Tusaale ahaan, inaad ilmo iska soo ridday ama aad leedahay naafonimo, iyo/ama macluumaadka kale ee aad na siisay ee ku saabsan caafimaadkaaga markaad raadsaneysay

wakiil sharci, marka aad sheekadaada uga warranto ololaha ACLU of Minnesota, iyo/ama aad ka codsato wax horay ugu sii qabanqaabin dhacdo ACLU of Minnesota .

- **Isdhexgalka.** Tusaale ahaan, taariikhda wax iibsiga iyo deeqaha, xaalka xubinimada, iyo tallaabooyinka udoodidda ee uu qofku qaaday.
- **Danaynaha.** Tusaale ahaan, xoriyaadka madaniga ah ama ololayaasha aad si gaar ah u xiisaynayso inaad maqasho, ama macluumaad guud oo dheeraad ah oo ku saabsan waxyaabaha aad xiiseeneyso ee shaqsi ahaaneed iyo kuwa xirfadeed ee khuseeya ka qaybgalkaaga ACLU of Minnesota iyo shaqadeena.
- **Sharciyad.** Tusaale ahaan, koodhka boosta aaggaaga ama degmadaada si ay nooga caawiyaan aqoonsiga degmadaada codbixinta ama wakiiladaadda hadda jira.
- **Sharciga.** Tusaale ahaan, tafaasiisha ku saabsan shuruudaha xabsi dhigista ama xidhista kale ee laga yaabo inay ku xad-gudbeen xuquqdaada madaniga ah ama xoriyada aad na siisay markaad raadsaneysay wakiilnimada sharciga ah ama ka sheegeysay sheekadaada ololaha ACLU of Minnesota.
- **Door biditaanada.** Tusaale ahaan, habka(abka) xidhiidhka ee aad doorbidayso.
- **Wax is-weydaarsiga.** Tusaale ahaan, faahfaahinta kaararka kiridhitka ama ka dhibitka ee aad bixiso si aad u sameyso lacag deeq ah ama aad u iibsato bedeecadda ACLU of Minnesota.
- **Nuxurka uu isticmaaluhu sameeyay.** Tusaale ahaan, sheekooyinka aad noo sheegto si qayb ka mid ah ololayaashayada sheeko-sheegidda ama fariimaha ku saabsan arrimaha aanu u dirno wakiilladaada sharci-dejinta anagoo magacaaga ku hadlayna. Tan waxa kale oo ku jira sawirada, muuqaalada, codka, iyo macluumaadka kale ee laga yaabo inaad noo soo gudbiso.
- **Wax kale.** Macluumaad kasta oo kale oo aad doorato inaad bixiso, oo ay ku jiraan macluumaadka loo arko inay "xasaasi yihiin" macluumaadka shakhsiyeed ee hoos yimaada sharciyada asturnaanta qaarkood, sida caqiidooyinka diineed, macluumaadka ku saabsan nooca galmada ama nolosha galmada, ama xaalka muwadinimada.

## Macluumaadka Aan Sida Tooska ah U Soo Uruurino

ACLU of Minnesota iyo qolooyinkeena saddexaad ee idman ayaa laga yaabaa inay isticmaalaan tignoolajiyada si ay si toos ah u helaan oo ay u duubaan macluumaadka marka aad nagula falgaleyso/xidhiidheyso onlaynka gudaha mareegahayaga iyo/ama tignoolajiyada kale ee dhijitaalka ah, sida madalyaasha iimaylka ah, ablikayshanadda moobilka ee ku xidhan Bayaankan Asturnaanta, ama wicitaan taleefoon (guud ahaan, “Adeegyada Dhijitalka”). Tignaloojiyadahan waxay u oggolaanayaan ACLU of Minnesota inay wanaajiso Adeegyadayadeena Dhijitaalka ah, si ay ugu abuuraan waayo aragnimo ka wanaagsan tan hadda jirta isticmaalayaasheena, iyo si ay uga ilaaliyaan khiyaanada.

Tignoolajiyadan waxaa ku jiri kara xog keydiyayaasha - faylal yaryar oo lagu rakibo baraawsarkaaga kuwaas oo loo isticmaali karo in si gaar ah loogu aqoonsado adiga oo lagu diiwaangeliyo macluumaadka ku saabsan mareegaha aad booqato - iyo tignoolajiyadaha kale, sida sawirada yaryar, faylasha cad ee sawirada ee yaryar, iyo faylasha sawirada yaryar ee halka-pixel ah, kuwaas oo adeegsada koodka waxyaabaha la dhex-geliyo ee Adeegyadayadeena Dhijitalka ah si loo diiwaangeliyo faahfaahinta ku saabsan isticmaalkaaga ku aadan Adeegyadaas Dhijitalka ah, sida haddii aad furtay iimayl ama aad gujisay linki.

Tignaloojiyadahan waxa laga yaabaa in anaga ama hay'adaha kale ee aanu oggolaano ay meeleeyaan. Waxaan u oggolaanaa qolo saddexaad oo keliya inay teknoolojiyaddan ku meeleeyaan Adeegyadayada Dhijitaalka ah haddii kuwa saddexaad ee idman ay u hoggaansamaan shuruudaheena qarsoodinimada iyo amniga hoos yimaada ee lagu sharraxay Ciddee iyo Sida Aanu Ula Wadaagno Macluumaadkaaga.

ACLU of Minnesota iyo qolooyinka saddexaad ee idman ayaa si toos ah u soo uruurin kara qaybahan macluumaadka:

- **Goobta Xiriirka.** Tusaale ahaan, cinwaankaaga iimaylka ama lambarka taleefankaaga.
- **Aqoonsadayaasha aaladda.** Tusaale ahaan, nooca taleefankaaga, nooca barawserka ee shirkadda taleefanka, ama nidaamka daalacashada ee aad isticmaasho si aad u daalacato boggageena.
- **Cinwaanka IP-ga ama macluumaadka laga yaabo in laga soo saaro.** Tusaale ahaan, qiyaasta goobtaada juqraafiyeed ee aad joogto.
- **Isdhexgalka.** Tusaale ahaan, nuxurka aad ka gujiso ama ka eegto gudaha iimayladayada, inta wakhtiga aad ku bixiso mareegaheena, ama URL-ka tixraac ahaanta laguu siiyo.

## Xogta Aan Ka Helno Kuwa Kale

ACLU of Minnesota waxaa laga yaabaa inay xogtaada ka hesho ilo qolo saddexaad ah, sida iskaashatooyinka xogta ee kuwa aan faa'iido doonka ahayn; ururrada kale ee aan xisbiyada ahayn; la-hawlgalayaasha isbahaysiga; faylka codbixiyayaasha ganacsiga iyo adeeg-bixiyeyaasha cilmi-baarista macaamiisha; iyo wakaaladaha kala duwan ee federaalka, gobolka, iyo dawladda hoose (tusaale, xogta diiwaanka dadweynaha ama macluumaadka laga helay iyadoo loo maraayo codsiyada FOIA ee aanu u isticmaalno inaan ku raadino xadgudubyada ka dhanka ah xoriyadda madaniga ah). Waxaan u helnaa macluumaadkan si aan wax badan kaaga ogaano adiga - oo ay ka mid tahay sida ugu wanaagsan ee aan kuula macaamileyno - si aan u aqoonsano dadka adiga oo kale ah oo laga yaabo in ay xiisaynayaan iney war ka helaan ACLU of Minnesota, iyo in aan cilmi-baaris ku sameyno oo aana qiimeyno sheegashooyinka suurrtagalka ah ama kuwa socda ama u-doodista ku saabsan xuquuqda madaniga ah iyo arrimaha xoriyadda madaniga ah. Waxa laga yaabaa in aanu ka soo ururino qaybahan xogta soo socda ilo qolo saddexaad ah:

- **Goobta Xiriirka.** Tusaale ahaan, lambarka taleefankaaga, cinwaannada goobta aad degan tahay iyo iimaylka, ama boggagaaga aqoonsiga ee baraha bulshada.
- **Macluumaadka dadweynaha.** Tusaale ahaan, da'daada, jinsigaaga iyo sinjiyadaada/qowmiyadaada si loo qiimeeyo saameynta kala duwan ee kaaga imaan karta sharciyada, barashada kala duwanaanshaha taageerayaasheenna iyo codbixiyaasha si aan ugu sii hormarino ka go'anaanteena ku aaddan [Sinnaanta Nidaameed](), iyo go'aaminta sida ugu wanaagsan ee aan dadka uga qaybgelinno si ay u taageeraan dagaalka ka dhanka ah sharciyada xaddidaya xuquuqdooda madaniga ah, sida [joojinta xannibaadaha ilmo iska soo rididda]().
- **Isdhexgalka.** Tusaale ahaan, la falgalkaaga ururada kale ee aan xisbiyada ahayn, ururada aan faa'iido doonka ahayn, iyo shuraakada isbaheysiga ee ACLU of Minnesota, ama suurtogalnimadaada inaad taageerto ACLU of Minnesota iyo goobaha aan arrimaha ka qabno.
- **Xiisaha.** Tusaale ahaan, xoriyadda madaniga ah ama ololeyaasha aad xiisaynayso inaad maqasho ama taageerto.
- **Maaliyadda.** Tusaale ahaan, qiyaasta dakhliga qoyska, hantida maguurtada ah ama ganacsiga, ama hantida maguurtada ah ee la qiyaasay iyo mushaharka, taas oo ay ku jiri karto macluumaadka laga soo ogaaday xogta dadweyne ahaanta iyo ganacsi ahaanta- xogta la heli karo ee lagula falgeli karo deeq-bixiyeyaasha hadda jira iyo aqoonsashada deeq-bixiyeyaasha mustaqbalka imaanaya.
- **Sharciyad.** Tusaale ahaan, koodhka boosta aaggaaga ama degmadaada si ay nooga caawiyaan aqoonsiga degmadaada codbixinta ama wakiilada hadda jira.
- **Sharciga.** Tusaale ahaan, diiwaanada maxkamadda, tafaasiisha ku saabsan shuruudaha xabsi dhigista, ama xabsi geynta kale ee laga yaabo inay ku xad gudubtay xuquuqdaada ama xoriyadaada madaniga ah.

- **Codaynta.** Tusaale ahaan, deegaankaaga, diiwaangelinta codbixiyayaasha, saadaalinta iska-diiwaan-gelinta xisbiyada, ama macluumaadka ku saabsan taariikhdaada codbixinta doorashooyinkii hore.

## Macluumaadka Aan U Maleeno ee Aan Saadaalino

ACLU of Minnesota waxay isticmaali kartaa macluumaadka shakhsiyeed ee aan u soo aruurinay - si toos ah, si otomaatig ah, ama aan ka helnay qolo saddexaad - si ay isugu uruuriyaan, isugu geeyaan, oo ayna kaaga ogaadaan macluumaad cusub oo adiga kugu saabsan. Waxaan tan u sameynaa si aan u habayno isgaarsiinta iyo wacyigelinta, iyo si aan u wanaajino barnaamijyadayada iyo adeegyadayada.

ACLU of Minnesota iyo adeeg bixiyayaashayada ayaa laga yaabaa inay ogaadaan qaybahan macluumaadka:

- **Goobta Xiriirka.** Tusaale ahaan, xubnaha qoyskaaga ee la ogaaday.
- **Macluumaadka dadweynaha.** Tusaale ahaan, marka aynaan si toos ah u hubin karin xogta dadweynaha, waxa laga yaabaa inaan ku tiirsanaano moodheelada ama bixiyeyaasha adeegga si ay u qiimeeyaan aqoonsiga sinjiga ama jinsiyadda/qoomiyadda si loo qiimeeyo saameynta kala duwan ee sharciyadu ku yeelan karaan qofka, si aan wax uga barano kala duwanaanshaha taageerayaashayada iyo codbixiyayaasheena si aan u sii wadno ballanqaadkeena [Sinaanta Nidaameed](), oo aan u go'aansanno sida ugu wanaagsan ee dadka loogu hawlgelin karo si ay u taageeraan dagaalkeena ka dhanka ah sharciyada xaddidaaya xuquuqdooda madaniga ah, sida [joojinta xannibaadaha ilmo iska soo ridista]().
- **Maaliyadda.** Tusaale ahaan, waxaa laga yaabaa inaan isticmaalno moodheelo ama adeeg bixiyayaasha si aan u qiyaasno qaddarka aad u badan tahay inaad ku deeqdo.
- **Isdhexgalka.** Tusaale ahaan, suurtagalnimada loo maleenayo inaad la falgasho ACLU of Minnesota iyo meelaha ay arrimaheena ka jiraan.
- **Xiisaha.** Tusaale ahaan, xoriyadda madaniga ah ama ololeyaasha aad xiisaynayso inaad maqasho ama taageerto.
- **Door biditaanada.** Tusaale ahaan, habka(abka) xidhiidhka ee aad doorbidayso.
- **Codaynta.** Tusaale ahaan, suurtagalnimada la qiyaasay ee ku aaddan codeynta iyadoo lagu salaynayo aag arrin ay ka jirto.

# Sababta Aan U Isticmaalno Macluumaadkaaga

ACLU of Minnesota waxay soo ururisaa macluumaadkaaga khaaska ah si aan u sii hormarino hadafkeena anagoo adeegsanayna u-doodista iyo abaabulista, dacwadaha, iyo barnaamijyada lacag ururinta. Markaan habeeneyno, isticmaaleyno, ama wadaageyno macluumaadkaas, waxaan ku dabaqnaa qarsoodinimada habboon iyo shuruudaha amniga (eeg: [Sida Aan U-ilaalino Macluumaadkaaga]() iyo [Ciddee iyo Sida Aan Ula Wadaagno Macluumaadkaaga]()). Intaa waxaa dheer, waxaan hiigsaneynaa inaan isticmaalno kaliya macluumaadka gaarka ah ee lagama maarmaanka u ah ujeedada habaynta ee ACLU of Minnesota ee aan u soo aruurinay (eeg: [Mabaa'dideena Qarsoonimada Xogta]()).

- **U-doodista iyo Abaabulidda.** ACLU of Minnesota waxay ka shaqeysaa horumarinta awoodda u-doodisteena iyo abaabulkeena si aan u sii wadno gaadhista hadafkeena. Si tan loo sameeyo, ACLU of Minnesota waxay isticmaashaa macluumaadka shakhsi ahaaneed ee aad na siiso marka aad tallaabo qaaddo si aad ula wadaagto sheekooyinkaaga iyo waxyaabaha aad markhaatiga ka noqotay, si ay u gaarsiiso meeshii loogu gol lahaa codsiyadaada iyo fariimahaaga ficileed, iyo martigelinta dhacdooyinka. Waxa kale oo laga yaabaa inaan u isticmaalno macluumaadkaaga shakhsiyeed si aan u abaabulno tabaruceyaal iyo hawl-wadeenno taageeraya shaqadayada.

- **Lacag uruurin.** ACLU of Minnesota, ka urur ahaan aan faa'iido doon ahayn, waxay u baahan tahay taageero deeq-bixiye si ay awood ugu yeelato hawlaheeda. Si tan loo sameeyo, ACLU of Minnesota waxay isticmaashaa macluumaadkaaga shakhsiyeed si ay u habayso deeqahaaga oo ay u codsato deeqo.

- **Adeegyada Sharciga ah** Foundation waxay ka shaqeysaa inay ku guuleysato dagaalada maxkamadda iyo kiisaska Maxkamadda Sare ee udub-dhexaadka u ah aagaga arrimaheena, iyo inay bixiso adeegyo kale oo sharci oo muhiim ah oo ku saabsan xoriyada madaniga ah ee muhiimka ah iyo xuquuqda macaamiisha ee Foundation. Si tan loo sameeyo, ACLU of Minnesota waxay isticmaashaa ilo laga yaabo inay ku jiraan macluumaadkaaga shakhsiyeed si ay u baarto xadgudubyada xoriyadda madaniga ah, u qiimeeyso codsiyada matalaadda sharciga, iney isku deydo iney hesho macaamiisha suurtagalka ah, iney dacwadaha geyso maxkamadda, iyo iney si wax ku ool ah u matasho macaamiisha Foundation.

- **Badeecada.** ACLU of Minnesota waxay bixisaa badeeco si ay u taageerto dadaalladayada u-doodista iyo lacag ururinta. Markaad dalbato badeecad, ACLU of Minnesota waxay isticmaashaa macluumaadkaaga shakhsiyeed si ay akoonkaaga uga diiwaan geliso dukaankayaga ama u habeyso lacag-bixinadaada.

- **Wacyigelinta iyo Cilmi-baarista.** ACLU of Minnesota waxay ka shaqeysaa inay ku siiso macluumaadka ku saabsan meelaha aad u aqoonsatay inay muhiim kuu yihiin, iyo inay u raadiso taageerayaal cusub hadafkeena. Si tan loo sameeyo, ACLU of Minnesota waxay isticmaashaa macluumaadkaaga shakhsiyeed si ay dadka u gaarsiiso fursadaha lagu taageerayo hadafka ACLU of Minnesota iyada oo loo marayo wadooyin isgaarsiineed oo kala duwan, oo ay ku jiraan xayaysiin dadka lala beegsado, oo ku salaysan bogga aqoonsiga ee la-falgalkaaga, dhegeysiga bulshada, iyo cod-bixinta.

- **Ammaanka Adeegyada, Tayeynta, iyo Horumarinta.** ACLU of Minnesota waxay ka shaqeysaa inay ku siiso khibrad aamin ah oo la wanaajiyey oo la falgasha Adeegyadeena Dhijitalka ah, iyo si loo horumariyo barnaamijyadayada iyo adeegyadayada si aan u horumarino shaqadayada dhawridda iyo ilaalinta xuquuqda madaniga ah iyo xorriyadaha guud ahaan. Si tan loo sameeyo, ACLU of Minnesota waxay u isticmaashaa macluumaadkaaga gaarka ah: tijaabinta khibrada-isticmaalaha, qiimaynta waxqabadka mareegta, ogaanshaha khayaanada, diiwaangelinta koontada, iyo in la sameeyo cilmi baadhis gudeed si loo horumariyo loona wanaajiyo adeegyadayada, alaabadeena, iyo tignoolajiyadaheena.

- **Marka Uu Sharcigu U Baahan Yahay, Si Looga Hortago Khayaanada, oo Loo Ilaaliyo Xuquuqdeena ama ta Kuwa Kale.** ACLU of Minnesota, ka ahaan urur aan faa'iido doon ahayn, waa inay u soo gudbisaa warbixinnada deeqaha hay'adaha dawladda oo ay fuliso waajibaadyada kale ee sharciga ah, sida u hoggaansanaanta [Dookhyadaada iyo Xuquuqdaada](). Si tan loo sameeyo, ACLU of Minnesota waxay isticmaashaa macluumaadkaaga shakhsiyeed si ay u fuliso waajibaadyadaas (tusaale ahaan, xaqiijinta in macluumaadkaaga laga tirtiro nidaamkayaga haddii aad codsato). Intaa waxaa dheer, ACLU of Minnesota waxay u baahan kartaa inay isticmaasho macluumaadkaaga shakhsiyeed si ay uga hortagto khiyaamo ama si ay u ilaaliso xuquuqdeena ama ta kuwa kale (tusaale, cilmi baadhista macluumaadkaaga shakhsi ahaaneed haddii aanu haysano sabab aanu ugu malaynayno inaad isticmaalayso magaceena iyo astaanteena la'aanta fasaxeena).

## Habaynta Hawlaha iyo Isticmaalada

Ma jiro hab "hal-cabbir ah oo ku wada habboon dhammaan" wax la dhaho sida ACLU of Minnesota u habeyso oo u isticmaasho macluumaadka shakhsiyeed. ACLU of Minnesota waxay ku dadaashaa daah-furnaan ku saabsan macluumaadka shakhsiyeed ee aan soo ururino iyo sida aan u isticmaalno. Shaxdani waxa ay si dheeraad ah u faahfaahinaysaa hawlaheenna habaynta macluumaadka shakhsiyeed iyo ujeeddooyinkooda, qaybaha xogta shakhsi ahaaneed ee aanu habayno (eeg Macluumaadka Shakhsi ahaaneed ee Aanu Soo Uruurino wixii macluumaad dheeraad ah), iyo qaybaha qolooyinka aan la wadaagi karno macluumaadkaaga (eeg Ciddee iyo Sida Aanu Ula Wadaagno Macluumaadkaaga wixii macluumaad dheeraad ah).

| Habaynta Hawsha iyo Isticmaalka | Ujeedada(ooyinka)*^ | Nooca(yada) Macluumaadka* | Ciddee Ayaa Laga Yaabaa Inaan La Wadaagno Macluumaadka^ |
|---|---|---|---|
| **Sameynta iyo maareeynta akoon:** Si aad u sameyso oo aadna u maareyso akoonkaaga. Akoonnada ayaa laga yaabaa in loo sameysto bakhaarkeena onlaynka. | • Badeecada<br>• Amniga Adeegga, Tayeynta, iyo Wanaajinta | • Diiwaangelinta akoonka<br>• Goobta xiriirka | • Adeeg bixiyayaasha |
| **Shaacinta wararka soo cusboonaada iyo kula soo xidhiidhida adiga:** Si aan kuula socodsiino waxyaabaheena mudnaanta leh iyo fursadaha aan ku lug yeelan karno, iyo ka jawaabista su'aalaha aad nasoo weydiisay. Tani waxay noqon kartaa boostada tooska ah, iimaylka, wicitaanada taleefanka, iyo fariimaha qoraalka waxaana ku jira mid kasta oo ka mid ah liisaskayaga tallaabo-qaadista ama suuqgeynta ee aad rukumatay. | • U-doodista iyo Abaabulidda<br>• Lacag uruurin<br>• Adeegyada Sharci<br>• Wacyi-gelinta iyo Cilmi-baarista<br>• Badeecada<br>• Amniga Adeegga, Tayeynta, iyo Wanaajinta | • Goobta xiriirka<br>• Macluumaadka dadweynaha<br>• Isdhexgalka<br>• Danaynaha<br>• Door-biditaanada<br>• Nuxurka uu isticmaaluhu sameeyay<br>• Codaynta | • Adeeg bixiyayaasha |
| **Samaynta cilmi-baaris iyo falanqaynta macluumaadka si loo wanaajiyo waxtarka wacyigelinteena iyo isgaarsiinteena:** Si loo xaqiijiyo inaad hesho fursadaha ugu habboon, waxaanu isticmaalnaa macluumaadka shakhsiyeed si aanu u qaabayno oo aanu u aqoonsano cidda ay u badan tahay inay taageerto aag arrin ama olole iyo qaybinta fariimahayaga. | • U-doodista iyo Abaabulidda<br>• Lacag uruurin<br>• Amniga Adeegga, Tayeynta, iyo Wanaajinta | • Goobta xiriirka<br>• Macluumaadka dadweynaha<br>• Aqoonsadayaasha aaladda<br>• Maaliyadda<br>• Isdhexgalka<br>• Danaynaha<br>• Door-biditaanada<br>• Codaynta | • Ururada nagu xidhan<br>• Adeeg bixiyayaasha |
| **Geynta codsiyo qoran iyo tallaabooyinka fariimeed ee kale:** Si loo fududeeyo codsiyada qoran iyo tallaabooyin farriimeedka kale ee ku socda bartilmaameedyadayada u- | • U-doodista iyo Abaabulidda | • Goobta xiriirka<br>• Nuxurka uu isticmaaluhu sameeyay | • Shuraakada Ganacsi (Shuraakada Isbaheysiga) |

| | | | |
|---|---|---|---|
| doodista (sida fariimaha loo diraayo xubinka kugu metala aqalka Congresska). | | | • Adeeg bixiyayaasha<br>• Qolooyinka Kale ee Saddexaad (Bartilmaameedyada u-doodista) |
| **Qiimeynta codsiyada iyo bixinta adeegyo sharci:** Si loogu qiimeeyo codsiyada kaalmada sharci, tallaabada sharci ee suurtagalnimada ah iyo midda la sugayo, iyo in la gaarsiiyo adeegyada sharciga macaamiisha Foundation. | • Adeegyada Sharci<br>• Amniga Adeegga, Tayeynta, iyo Wanaajinta | • Goobta xiriirka<br>• Macluumaadka dadweynaha<br>• Maaliyadda<br>• Caafimaadka<br>• Xukunka<br>• Sharciga<br>• Nuxurka uu isticmaaluhu sameeyay | • Ururada nagu xidhan<br>• Shuraakada Ganacsiga (Qareenada Wadajira)<br>• Adeeg bixiyayaasha |
| **Martigelinta Machadkeena u-doodista ee Qaranka iyo dhacdooyinka kale:** Si loo qorsheeyo loona martigeliyo dhacdooyinka ku dhaca iyagoo la soo xaadiraayo ama kuwa sida fogaan aragga ku dhaca, oo ay ku jiraan doorashada ka qaybgalayaasha, abaal-marinta deeqaha waxbarasho, isku-dubbaridka safarka, hooynta, ama wax horay u sii qabanqaabinada kale iyo qorshaynta saadka. | • U-doodista iyo Abaabulidda<br>• Lacag uruurin<br>• Adeegyada Sharci<br>• Wacyi-gelinta iyo Cilmi-baarista<br>• Amniga Adeegga, Tayeynta, iyo Wanaajinta | • Goobta xiriirka<br>• Macluumaadka dadweynaha<br>• Maaliyadda<br>• Caafimaadka<br>• Isdhexgalka<br>• Danaynaha<br>• Sharciga<br>• Nuxurka uu isticmaaluhu sameeyay | • Ururada nagu xidhan<br>• Adeeg bixiyayaasha |
| **Abaabulidda mutadawiciinta::** Si loo abaabulo mutadawiciinta si cod looga codsado, wicitaano cod raadis, ama si halmar farriin loogu wada qoro kuwaas oo taageero loogu raadinaayo aag arrineed ama ololе. | • U-doodista iyo Abaabulidda<br>• Amniga Adeegga, Tayeynta, iyo Wanaajinta | • Goobta xiriirka<br>• Isdhexgalka<br>• Danaynaha | • Ururada nagu xidhan<br>• Adeeg bixiyayaasha |
| **Ka qayb-qaadashada iskaashatooyinka wadaaga xogta iyo habaynada liis wadaagista si loo aqoonsado deeq-bixiyayaasha mustaqbalka imaanaya ee ACLU of Minnesota loona xoojiyo taageerada:** Si aan u kobcino oo aan u xoojino aasaaska deeq-bixiyeyaasheena, waxaan ka qayb-galnaa is-weydaarsiga liisaska ee ururada isku ra'yiga ah, aanan raacsaneyn wax xisbi ah, oo aan la falgalnaa iskaashatooyinka wadaaga xogta ee aan faa'iido doonka ahayn. | • Lacag uruurin | • Goobta xiriirka<br>• Isdhexgalka | • Shuraakada Ganacsiga (Iskaashatooyinka Wadaagga Xogta ee ururada aan faa'iido doonka ahayn, Ururada Aan Xisbiyada Taabacsaneyn)<br>• Adeeg bixiyayaasha |

| | | | |
|---|---|---|---|
| **Ka-hortagga khiyaanada:** Si ay ACLU of Minnesota uga hor istaagto jilayaasha khayaanada leh iney lacag-bixin ku sameeyaan gudaha mareegaheena. | • Amniga Adeegga, Tayeynta, iyo Wanaajinta | • Goobta xiriirka<br>• Aqoonsadayaasha aaladda<br>• Isdhexgalka<br>• Cinwaanka IP-ga ama macluumaadka laga soo saari karo | • Adeeg bixiyayaasha |
| **Habaynta lacag-bixinta:** Si loo habeeyo deeqahaaga ama lacag bixintaada aad ku bixineyso adeegyada kale sida diiwaangelinta iyo bixinta lacagta tikidhada ee dhacdooyinka ay martigeliso ACLU of Minnesota. Tan waxa ka mid ah maaraynta lacag-bixinta, kharashaadka, iyo dardaaranka hantida iyo xisaabaadka maaliyadeed. | • U-doodista iyo Abaabulidda<br>• Lacag uruurin | • Goobta xiriirka<br>• Maaliyadda<br>• Macaamilaada ganacsi | • Adeeg bixiyayaasha |
| **Xadgudubyada ka dhanka ah cilmi-baarista ee xorriyadda madaniga ah:** Si loo baaro oo loo falanqeeyo saamaynta sharciyada, siyaasadaha, iyo dawladda ama falalka kale ee daneeyayaasha. Tan waxa loo samayn karaa si loogu diyaariyo oo loo xoojiyo sheegashooyinka sharciga ah, ololayaasha u-doodista ee ACLU of Minnesota, ee waxbarashada dadweynaha, iyo/ama barnaamijyada gaarka ah. Tusaale ahaan:<br>• Samaynta falanqaynta saamaynta kala duwan ee xogta laga soo ururiyay wakaaladaha dawladda iyada oo loo marayo codsiyada FOIA;<br>• Falanqaynta diiwaanada shaqada ee galaangalka naloo siiyay si aan ula socono u hogaansanaanta loo shaqeeyaha ee ku aadan xallinta takoorka shaqada anagoo ka wakiil ah macaamiisheena; ama<br>• Falanqaynta xogta laga helay waaxyaha booliiska iyadoo la | • U-doodista iyo Abaabulidda<br>• Adeegyada Sharci<br>• Amniga Adeegga, Tayeynta, iyo Wanaajinta | • Goobta xiriirka<br>• Macluumaadka dadweynaha<br>• Maaliyadda<br>• Caafimaadka<br>• Xukunka<br>• Sharciga | • Ururada nagu xidhan<br>• Shuraakada Ganacsi (Shuraakada Isbaheysiga, Qareenada-wadajira)<br>• Adeeg bixiyayaasha |

| | | | |
|---|---|---|---|
| raacayo heshiisyada khilaafaad xallinta. | | | |
| **Amni-sugidda iyo tayaynta Adeegyadayada Dhijitalka ah:** Si aan uga dhigno Adeegyadeena Dhijitaalka ah kuwo fudud, aad u wacan in la isticmaalo, oo waxtar leh iyadoo la kormeerayo, qiimaynayo, lana samaynayo cilmi-baadhisyo kale iyo hawlgallo gudeed si loo amni-sugo, loo tayeeyo, loona horumariyo adeegyadeena, tignoolajiyadaheena, iyo alaabaheena. | • U-doodista iyo Abaabulidda<br>• Lacag uruurin<br>• Wacyi-gelinta iyo Cilmi-baarista<br>• Amniga Adeegga, Tayeynta, iyo Wanaajinta | • Aqoonsadayaasha aaladda<br>• Isdhexgalka<br>• Cinwaanka IP-ga ama macluumaadka laga soo saari karo | • Adeeg bixiyayaasha |
| **Adeegista iyo wanaajinta xayeysiisyada dadka lala beegsado:** Si aan u gaarsiino xayeysiiska dadka ay u badan tahay inay taageeraan arrimaheenna, iyo si loo horumariyo xayaysiisyadayada beegsiga ah, waxa laga yaabaa inaan isticmaalno xogta waxqabadka xayeysiiska ee la isku daray sida inta qofood ee daawatay, inta mar ee la gujiyay, iyo dadku waxeey u beddeleen kadib daawashada xayeeysiiska. | • U-doodista iyo Abaabulidda<br>• Lacag uruurin<br>• Amniga Adeegga, Tayeynta, iyo Wanaajinta | • Goobta xiriirka<br>• Macluumaadka dadweynaha<br>• Isdhexgalka<br>• Danaynaha<br>• Cinwaanka IP-ga ama macluumaadka laga soo saari karo<br>• Xukunka<br>• Codaynta | • Shuraakada Ganacsiga (Xayeeysiiyayaasha Qolada-seddexaad)<br>• Adeeg bixiyayaasha |
| **Codsashada codsiyada loogu talagalay taageerada sharciga ah:** ACLU of Minnesota waxaa laga yaabaa inay si toos ah ama si dadbanba kuu weydiisato ka dacwoode macquul ah haddii aan u maleyneyno inaad ka faa'iideysan karto adeegyadayada. Waxa kale oo aad go'aansan kartaa in aad la xidhiidho ACLU of Minnesota si aad u hesho taageero sharci, xaalkastoo uu noqdo, waxa laga yaabaa in aanu habayno macluumaadkaaga si aan u go'aamino haddii aanu ku caawin karno iyo/ama aan kuu sii gudbin karno ururada ku caawin kara. | • Adeegyada Sharci<br>• Amniga Adeegga, Tayeynta, iyo Wanaajinta | • Goobta xiriirka<br>• Macluumaadka dadweynaha<br>• Maaliyadda<br>• Caafimaadka<br>• Isdhexgalka<br>• Danaynaha<br>• Xukunka<br>• Sharciga<br>• Codaynta<br>• Nuxurka uu isticmaaluhu sameeyay | • Ururada nagu xidhan<br>• Shuraakada Ganacsiga (Qareenada-wadajira)<br>• Adeeg bixiyayaasha |
| **Sheeko-sheegidda:** ACLU waxay ururisaa sheekooyinkaaga si ay kor ugu qaaddo wacyiga ku saabsan markhaanti furitaanada caddaalad-darrada oo qayb ka ah dhisidda dhaqdhaqaaqyadeena. | • U-doodista iyo Abaabulidda<br>• Lacag uruurin<br>• Adeegyada Sharci<br>• Amniga Adeegga, Tayeynta, iyo Wanaajinta | • Goobta xiriirka<br>• Macluumaadka dadweynaha<br>• Caafimaadka<br>• Nuxurka uu isticmaaluhu sameeyay | • Ururada nagu xidhan<br>• Adeeg bixiyayaasha<br>• Shuraakada Ganacsi (Shuraakada Isbaheysiga) |

***Xaalad Gaar ah:** Xaaladaha qaarkood, waxa laga yaabaa inaan u ururino ama u isticmaalno macluumaadkaaga shakhsi ahaaneed siyaabo aan lagu sifeyn shaxdan. Xaaladahaas, waxaanu ku sifayn doonaa sida aanu u isticmaalno ama u wadaagno macluumaadkaaga shakhsiyeed marka la joogo goobta xog u ururinta.

**^Marka uu Sharcigu U Baahan Yahay, si Looga Hortago Khayaano, oo Loo Ilaaliyo Xuquuqdeena ama ta Kuwa kale:** ACLU of Minnesota waxaa laga yaabaa inay sidoo kale u isticmaasho macluumaadkaaga si ay u fuliyaan waajibaadkeena sharci. Hawlaheena habayntu waxay u baahan karaan inaan macluumaadkaaga aan la wadaagno hay'adaha dawladda, kuwa sharci fulinta, ama cid kale oo saddexaad, tusaale ahaan marka aanu qiimaynayno khatar suurtagal ah oo aad nagu samaysay. Eeg Ciddee iyo Sida Aanu Ula Wadaagno Macluumaadkaaga..

Marka lagu daro ujeedooyinka habaynta ee lagu sifeeyay ogaysiiskan, waxa kale oo laga yaabaa in aanu ka saarno aqoonsiga macluumaadka shakhsiyeed halka ay suurtagal tahay. Waxaa laga yaabaa inaan ka saarno aqoonsiga macluumaadka shaqsi ahaaneed ee jira si aan si firfircoon u yareyno xogta aan hayno marka aqoonsiga macluumaadka aysan ahayn mid aan loo sii baahnayn. Waxa kale oo laga yaabaa inaan ka saarno waxyaabaha aqoonsashada macluumaadka si aan meesha uga saarno macluumaadkaaga lagugu aqoonsan karo diiwaanada ay tahay in loo hayo sababo sharci ah marka aad ka codsato ACLU of Minnesota inay tirtirto macluumaadkaaga. Markaan ka saarno waxyaabaha lagu aqoonsan karo macluumaadka si dhamaystiran sababo la xidhiidha ujeedooyinka qarsoodinimada, waxaan u isticmaali doonaa oo kaliya qaabkeeda aan la aqoonsan karin mana isku dayeyno in aan dib u aqoonsano macluumaadka.

# Ilaa Intee Ayaanu Sii Hayneynaa Xogtaada

ACLU waxay sida caadiga ah hayn doontaa macluumaadkaaga shakhsi ahaaneed ilaa iyo inta aanu xidhiidhka kula leenahay adiga iyo/ama muddada lagama maarmaanka u ah la-falgelidda isticmaalka ama buuxinta ujeedooyinka lagu qeexay Bayaankan Qarsoonnimada, haddii aysan ahayn in wakhti hayn dheer loo baahan yahay ama uu oggolyahay sharciga ma ahane.

Waxaa laga yaabaa inaad na weydiisato inaan tirtirno macluumaadkaaga shakhsi ahaaneed sida lagu qeexay qaybta Dookhaaga iyo Xuquuqdaada ee hoose. Si kastaba ha ahaatee, fadlan ogoow in aan ku qasbanahay ama laga yaabo in aan sii hayno dhammaan, ama qayb ka mid ah, macluumaadkaaga shakhsiyeed sida uu sharcigu u baahan yahay ama uu oggol yahay, xaaladaha qaarkood, oo ay ku jiraan inuu noo oggolaado samaynta kuwa soo socda:

- U hoggaansamidda shuruudaha sii-haynta ee hoos yimaada sharciga, oo ay ku jiraan xeer-hoosaadka, sharciyaynta, ama shuruudaha kale ee dawladda, oo ay ku jiraan haysashada macluumaadka shakhsiyeed muddada ay socoto sheegashooyinka madaniga ah ama tallaabooyinka sharciyaynta laga yaabo in la xareeyo ama la bilaabo iyo muddada loo baahan yahay si loo xalliyo wax kasta oo dacwad sharci ah oo socda, ama u hoggaansamidda amarka maxkamad dembiiyeed madani, ama weydiimaha sharciyeed, baadhitaanada, amar maxkamadeedyada, ama u-yeedhista ka imaada dawladda
- Baadhno, gundhigno, ku dhaqano, isku diyaarino, ama difaacno sheegashooyin sharci
- Dhaqangelino ama raacno qandaraasyadayada oo xallino khilaafaadka;
- Ka ilaalino wax isdabamarinta, khiyaanada, ama dhaqdhaqaaqa sharci darrada ah, iyo khataraha ku aadan amniga, daacadnimada, ama badbaadada nidaamyadayada, adeegyada, iyo/ama shakhsiyaadka
- La falgelidda cilmi-baadhis seynis, mid taariikheed, ama istaatistikeed oo ay danta ugu jirto dadweynaha, si waafaqsan sharciga lagu dabaqi karo.

# Sida Aanu U Ilaalino Macluumaadkaaga

ACLU of Minnesota waxay qaaday tallaabooyin la taaban karo, kuwa farsameed iyo kuwa maamulba si loo ilaaliyo macluumaadka aanu soo uruurino. Waxaanu ka shaqaynaa inaanu xogtaada ilaalino oo aanu ka ilaalino marin u hel aan la ansixinin, iyo isticmaalka khaldan ee macluumaadka shakhsiyeed ee aanu ku ururinayno onlaynka.

- **Tallaabooyinka la taaban karo.** Tusaale ahaan, macluumaadkaaga shakhsi ahaaneed, sida magacaaga iyo cinwaankaga, waxa lagu kaydiyaa seerfarada ay qasabka tahay in lagu dhawro ilaalino cuddudeed.
- **Tallaabooyinka farsameed.** Tusaale ahaan, xogta loo gudbiyo lagana soo diro shabakadahayada, oo ay ku jiraan lambarada kaadhka kiridhitka, ayaa si qarsoodi ah loo gudbiyaa.
- **Tallaabooyinka maamuleed.** Tusaale ahaan, waxaanu dejinay siyaasadaha gaarka ah iyo kuwa amniga iyo habraacyada lagu xaddidayo helitaanka macluumaadka shakhsiyeed. Waxaan sidoo kale u hoggaansanahay tayooyinka ganacsiyada waxaanan si joogto ah ula soconaa u hoggaansanaantayada Tayooyinka Shirkadaha Ganacsiga ee Kaarka Lacag-bixinta si aan u ilaalinno macluumaadka kaararka kiridhitka ee aad na siiso.

# Ciddee iyo Sida Aanu Ula Wadaagno Macluumaadkaaga

Qaybtani waxa ay ku siinaysaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida aanu ula wadaagno macluumaadkaaga shakhsi ahaaneed gobbolkayaga iyo ururada nagu xidhan ee maxaliga ah, adeeg bixiyayaasheena, shuraakadeena ganacsiga, iyo qolooyinka kale ee saddexaad.

Waxaan wadaagnaa macluumaadka shakhsiyeed anagoo adiga kaa heysano oggolaanshahaaga, marka aad nagu amarto in aan la wadaagno kuwa kale, sida lagama maarmaanka ah si loo dhamaystiro wax kala iibsigaaga, ama si loo bixiyo adeegyada aad codsatay ama idmatay. Tusaale ahaan, marka aad bixiso macluumaadka kaadhka kiridhitka si aad u bixiso deeq, waxaanu la wadaagi doonaa xogtaas habeeyayaasha lacag-bixinta kaadhka iyo hay'adaha kale sida lagama maarmaanka u ah si loo habeeyo lacag bixintaada iyo si looga hortago ama loo ogaado khiyaano.

Waxaan sidoo kale la wadaagnaa macluumaadka shakhsiyeed noocyada soo socda ee qolooyinka kale:

## Ururadeena Xulafada ah

Si aan halka ugu saraysa u gaadhsiino saamayntayada dalka oo dhan, ACLU of Minnesota waxay si wadajir ah ula shaqeysaa oo la wadaagtaa macluumaadkaaga shakhsiyeed Xulafadayada kala jooga gobolkeena/deegaankeena/dhulalkeena Xulafada ee daafaha Maraykanka iyo Qaranka si loogu abuuro waayo-aragnimo caqligal ah taageerayaasheenna, xubnaheena, iyo dadweynaha. Tusaale ahaan, marka aad xubin ka noqoto Ururka Qaranka, waxaad sidoo kale noqon doontaa xubin ka tirsan Ururka Midowga ee ACLU of Minnesota (haddii cinwaanka boostada ee aad ku bixisay deeqda uu ka tirsan yahay gobolkayaga ama dhulkeena). Waxa kale oo laga yaabaa inaan la ururinno ama la wadaagno macluumaadkaaga shakhsiyeed Ururada xidhiidhka la leh ACLU.

Iyadoo Ururada ACLU ay u hoggaansamaan [mabaadi'da qarsoodinimada] iyo halbeegyada maaraynta macluumaadka gaarka ah ee aan la wadaagno midba midka kale, Urur kasta oo ACLU ah ayaa laga yaabaa inuu lahaado hab-dhaqamo lagu maareeyo xogta oo u gaar ah oo aanan lagu darin gudaha Bayaankan. Markaan la wadaagno macluumaadkaaga shakhsi ahaaneed Ururada kale ee ACLU, waxay ku qasban yihiin inay u isticmaalaan macluumaadka si waafaqsan bayaankooda qarsoodinimada iyo si

khuseysa hawlahooda u gaarka ah. Si aad u eegto liiska bayaanada asturnaanta ee dhammaan Ururada ACLU, akhri Bayaanada Qarsoodinimada ee Ururada ACLU.

## Adeeg-bixiyayaasha

Waxaan la shaqaynaa adeeg bixiyayaal kala duwan kuwaas oo naga caawiya habsocodka macluumaadkaaga khaaska ah sida ku qeexan gudaha Sababta Aan U Isticmaalno Macluumaadkaaga ee kor ku xusan, sida si loogu fududeeyo shaqada goobaheena; loo taageero lacag ururinteena, suuq geynteena, isgaarsiinteena, iyo barnaamijyadeena u-doodista; iyo in lagugu soo gaarsiiyo fariimaheena madalada kale.

Waxaan uga baahanahay adeeg bixiyayaashan inay oggolaadaan inay qaadaan tallaabooyin ammaan oo macquul ah si ay u maareeyaan una kaydiyaan macluumaadkaas. Marka aan la wadaagno macluumaadka shakhsiyeed ee kugu saabsan adeeg bixiyaha, waxaanu qaadnaa tallaabooyin si: (1) aan ugu gudbino si ammaan ah oo (2) waxaan uga baahanahay adeeg bixiyaha inuu ballanqaado inuu xafido macluumaadkaas oo uu u isticmaalo oo keliya ujeeddada fulinta hawlaha aan u dirnay inay qabtaan.

Waxaan u oggolaanaa qaar ka mid ah bixiyeyaasha adeegga inay ururiyaan oo isticmaalaan macluumaadka qaarkood ee la xiriira ACLU of Minnesota iyo/ama isticmaalka taageerayaasheeda ee adeegyada ee ujeedooyinka gudeed, sida wanaajinta shaqeynta ama amniga adeegyada ay ACLU of Minnesota ka heleyso adeeg bixiyaha., Xaaladaha qaarkood, tani waxaa ka mid noqon kara tababarka adeeg-bixiyayaasha adeegga ee qalabyada caqliga macmalka ah ama sifooyinka loogu talagalay adeegyada ay siiyaan ACLU of Minnesota*. Intaa waxa dheer, waxa laga yaabaa in aanu u oggolaano bixiyeyaasha adeegga inay abuuraan oo ku isticmaalaan xogta laga saaray waxyaabaha shakhsiga lagu aqoonsan karo ujeeddooyin ganacsi oo ballaadhan, oo ay ku jiraan la wadaagista xogta la isku daray ee bartilmaameedka shuraakadooda ganacsi, macaamiisha kale, ama qolooyinka kale ee saddexaad. Ma aqbali doono taas haddii aysan ka ahayn in uu adeeg bixiyaha si ku filan u go'aansado in aanu isku darin xogta iyo macluumaadka kale si dib laguugu soo aqoonsado adiga, oo uuna la wadaagin ama iibin ama isticmaali doonin xog kasta oo lagu aqoonsan karo oo kugu saabsan adiga ujeedo faa'iido u ah qolo saddexaad oo ka baxsan xidhiidhka ganacsi ee adeeg bixiyaha kala dhexeeya ACLU of Minnesota.

*ACLU of Minnesota waxay si dhab ah ula socotaa wakaaladdaada isticmaalka macluumaadkaaga shakhsiyeed. Sida caqliga macmalka ah uu sii kobcayo, waxa naga go'an inaanu la socono isku qalabeynta aaladaha caqliga macmalka leh ee adeeg bixiyaashayada ee horseedi kara khataraha gaarka ah ee aan dheeli tirnayn iyo khataraha kale ee ku iman kara xoriyadaha madaniga.

## Shuraakadda Ganacsiga

Xaaladaha qaarkood, waxa laga yaabaa inaan u siino macluumaadka shakhsiyeed iibiyeyaasheena iyo shuraakadeena ganacsi ee kale ujeedooyinkooda ganacsi. Taas beddelkeedana, waxa laga yaabaa inaan lacag ama shay kale oo qiimo leh ugu helno ACLU of Minnesota (tusaale, liiska deeq-bixiyeyaasha ama taageerayaasha ururada ay isku fikirka yihiin ee deeq-bixiyayaashooda iyo taageerayaashooda ay sidoo kale xiiseynayaan inay lacag ugu soo deeqaan oo ayna taageeraan ACLU of Minnesota). Waxa kale oo laga yaabaa in aanu macluumaadkaaga la wadaagno shuraakada ganacsiga oo qolooyin saddexaad ah haddii aad codsato. Tusaale ahaan, waxa laga yaabaa in aanu la wadaagno macluumaadka urur kale oo ah u-doode aan faa'iido doon ahayn kaas oo aanu la martigelinayno dhacdo ama aanu ka wada shaqayneyno isbahaysi balaadhan oo ku saabsan arrimaha xoriyada madaniga ah ee muhiimka ah.

Kuwan ah "Shuraakadda Ganacsiga" waxaa ka mid ah:

- **Shuraakada Isbahaysiga.** Si loo suurtageliyo u-doodista, abaabulidda, iyo dacwooyinka waxtarka leh, waxaan inta badan la shuraakoownaa ururada kale si aan u sii balaadhino shaqadayada. Waxaa laga yaabaa inaan macluumaadkaaga shakhsi ahaaneed la wadaagno shuraakadeena isbahaysiga si aan u sii wadno dadaalladaas oo aan u xoojinno awoodahayaga si aan u sii wadno howlgalladayada. Annagu, si kastaba ha ahaatee, waxaanu wadaagi doonaa oo keliya macluumaadkaaga khaaska ah haddii aad codsatay ama aad oggolaatay in la wadaago.
- **Qareen-wadaag. Sidii loogu baahdo,** ACLU of Minnesota waxa laga yaabaa inay la wadaagto macluumaadka shakhsiyeed qolo saddexaad inta ay socoto dacwadda, oo ay ku jiraan qareenada halka arrin ka wada shaqeenayaan, shuraakadda gudbinta, markhaatiyada khubarada ah, iyo dhinacyada kale ee ku hawlan dacwadaha mustaqbalka imaanaya iyo kuwa la sugayo. Macluumaadka shakhsiyeed ee aanu la wadaagno macnahan guud waxa laga yaabaa inay la xidhiidhaan adiga ama shakhsiyaadka kale ee aan ahayn macaamiil toos ah iyadoo ku xidhan arrinta sharciga ah. Tusaale ahaan, waxa laga yaabaa in aanu isticmaalno xogta cod bixiyayaasha ee la saadaaliyay taas oo ku habboon dacwadda xuquuqda cod-bixinta ee ka dhanka ah hay'ad dawlad goboleed. Marka qareennada ACLU of Minnesota ay wadaagaan macluumaadka shakhsiyeed, gaar ahaan macluumaadka macmiilka, waxay sidaas sameeyaan iyagoo raacaya xeerarka mas'uuliyadda xirfadeed ee ku dabaqma.
- **Iskaashatooyinka Wadaagga Xogta ee aan Faa'iido doonka ahayn.** Si aan u kobcino aasaaskeena deeq-bixiyeyaasha, ACLU of Minnesota waxay ka qaybqaadataa iskaashatooyinka wadaaga xogta ee loogu talagalay ururada aan faa'iido doonka ahayn. Iskaashatooyinka wadaaga xogtu waa adeegyo ku salaysan xubinnimada oo ay bixiyaan iibiyayaashu kuwaas oo awood u siinaya xubnaha iskaashatada in ay soo ururiyaan macluumaadka shakhsiyeed ee ku saabsan taageerayaashooda si ay u qaabeeyaan oo ay u aqoonsadaan taageerayaashooda cusub iyo/ama si qoto dheer u dhexgalaan taageerayaasha hadda jira. Marka aan ka qaybqaadano iskaashatooyinka wadaaga xogta, waxa laga yaabaa inaan wadaagno macluumaadkaaga shakhsi ahaaneed, oo ay ku jiraan macluumaadka xidhiidhka iyo midda isdhexgalka - tusaale ahaan, taariikhda lacag-deeqitaanada — iibiyeyaasha iskaashatada wadaaga xogta si aan ugu beddelno awoodda la xidhiidha shakhsiyaadka noqon doona taageerayaasha mustaqbalka ee ACLU of Minnesota iyo/ama macluumaadka qaabaysan ee ku saabsan taageerayaasha hadda jira ee ACLU of Minnesota kuwaas oo sidoo kale taageera xubnaha kale ee iskaashatada wadaaga xogta ee aan faa'iido doonka ahayn (tusaale, macluumaadka la qaabeeyey waxaa laga yaabaa inay ku jiraan suurtagalnimada inuu qof noqdo lacag ku deeqe ACLU of Minnesota bille ah). Hab-dhaqankan lagu wadaagayo macluumaadka shakhsi ahaaneed ee taageeraha iyo iyada oo loo marayo iskaashata wadaagga xogta waa dhaqan aan faa'iido doon ahayn oo soojireen ah kaas oo u suurtageliya hay'adaha aan faa'iido doonka ahayn inay ilaashadaan saldhig taageero oo xooggan - iyadoo la dhimayo kharashaadka - iyadoo la beegsanayo isgaarsiinta shakhsiyaadka ay u badan tahay inay xiisaynayaan inay wax ka maqlaan iyaga.
  ACLU of Minnesota waxay ku biiri doontaa iskaashatooyinka wadaaga xogta oo kaliya haddii iskaashatada ay si gaar ah ugu adeegto hay'adaha aan faa'iido doonka ahayn; aysan wax macluumaad ah ka helin ACLU of Minnesota oo ku saabsan taageereyaasha aan xogtooda hore loogu darin goobta xogta ee iskaashatada; ma siiso xubnaha iskaashatada awoodda ku aadan inay si toos ah u helaan maclumaadka ay bixisay ACLU of Minnesota; lama wadaagto macluumaadka laga soo bixiyay ACLU of Minnesota- macluumaadka la siiyay ururada xisbiyada; daaha kama qaadi doono ururka shakhsiga ee ACLU of Minnesota xubnaha iskaashatada; oo waxeyna waafaqsan tahay in laga saaro goobta lagu hayo xogta iskaashatooyinka oo la baabi'iyo macluumaadka ay bixiso ACLU of Minnesota marka aan ka baxno iskaashiga xogta.
- **Ururada Aan Xisbiga Ahayn (Liiska Kirada ama Beddelka).** Si loo kobciyo aasaaskeena deeq-bixiyayaasha, ACLU of Minnesota waxa laga yaabaa inay la wadaagto macluumaadkaaga xidhiidhka ururada kale ee aan xisbiga raacsaneyn, ha ahaato qaab kiro ah (waxaa loola jeeda, leh

khidmo lacageed) iyo/ama beddelka liis taageero oo la mid ah oo ka socda urur kale oo aan xisbi taageersaneyn oo ay ACLU of Minnesota la xidhiidhi karto. Wadaagista macluumaadkan waxay u oggolaanaysaa urur kasta inuu la xiriiro taageerayaasha ururka kale si uu u sii wato hadafkiisa. Wadashaqeyntani waxay muhiim u tahay ilaalinta aasaas deeq-bixiye oo xooggan iyadoo la dhimayo kharashaadka iyadoo la gaarayo taageerayaasha ugu ballaaran ee suurtogalka ah. Xogta lala wadaago hay'adaha aan xisbiga ka tirsaneyn waxaa lagu sameeyaa hab ku salaysan isticmaalka hal mar oo keliya.

Si loo ilaaliyo qarsoodinimadaada, heshiisyada liisas wadaagista ee lala galo ururada kale ee aan wax xisbi ah raacsaneyn waxaa lagu fuliyaa habayn sugan oo qarsoodi ah kaas oo ururka dibaddu aanu si toos ah uga helin macluumaadka adiga kugu saabsan ilaa aad doorato inaad ka qaybgasho. Isgaarsiinada laga soo saaro heshiisyada liisas wadaaga waxaa fuliya adeeg bixiyayaasha urur kasta oo aan raacsaneyn wax xisbi ah, tusaale ahaan, iibiyaha soo diyaariya oo diraya boosto geeya, kaas oo xogtaada ku xafida si qarsoodi oona ammaan ah. Ururka kale wuxuu bartaa macluumaadka ku saabsan xiriirka aad la leedahay ACLU of Minnesota kaliya haddii aad doorato inaad ka jawaabto isgaarsiinta dhinacooda saddexaad.

- **Xayeeysiiyayaasha Qolooyinka-seddexaad**. ACLU of Minnesota waxaa laga yaabaa inay kuugu soo bandhigto xayaysiisyada dadka lala beegsado madalo aan ahayn kuwa ACLU of Minnesota, mareego qolooyin saddexaad, iyo baraha bulshada, sida Facebook-ga iyo Instagram-ka, si aan lacag u ururino oo aan u dhisno taageerada u-doodista, abaabulida, iyo mudnaanta dacwadaha. Waxaan bartilmaameedsaneynaa xayeysiisyadayada si aan si waxkuool ah oo hufan u gaarno dadka ay u badan tahay inay tallaabo qaadaan, oo ay ku jiraan dadka ay saameeyeen siyaasadaha dawladda. Marka sidaas la samaynayo, waxa laga yaabaa in aanu xogtaada shakhsi ahaaneed la wadaagno xayaysiiyayaasha qolo saddexaad si aan ugu adeegno xayaysiimaha lala beegsanayo shakhsiyaad gaar ah (sida, hal-hal isku beegga), oo aad ku jirto, ama si aan ugu soo bandhigno xayeysiisyada dadka la mid ah shakhsiyaadka gaarka ah (waxaa loola jeedaa "kuwa isku eg") kuwaas oo la falgalay ACLU of Minnesota. Hab-dhaqamadani waxay naga caawiyaan ka qaybqaadashada lacag ururin iyo hawlo u-doodid waxkuool ah oo awood u siinaya kooxaheenna inay si waxkuool ah ula xiriiraan taageerayaasha la yaqaan iyo kuwa mustaqbalka imaanaya. Macluumaadka shakhsiyeed ee lala wadaago xayaysiisyada dhinac saddexaad waxaa loo beddelaa qaab koodh si loo wanaajiyo qarsoodinimada. Koodheynta xogtu waxaa loola jeedaa hab-dhaqanka u beddelidda xogta qaab hore loo sii qeexay si ay u adkaato in la aqoonsado. Waxaan kaliya la wadaagnaa xogta koodheysan xayaysiiyeyaasha qolo saddexaad kuwaas oo ballanqaaday inay u hayaan macluumaadka ACLU of Minnesota si qarsoodi ah oo ammaan ah, oo ballanqaaday inaanay u isticmaalin xog ay bixisay ACLU of Minnesota arrimo kale. Wixii ah macluumaad dheeri ah oo ku saabsan cidda aan la wadaagnay macluumaadkaaga shakhsiyeed ujeedooyin xayaysiis la beegsanayo awgood, fadlan eeg Xayeysiyeyasha qolooyinka saddexaad.

## Qolooyinka Seddexaad ee Kale

Waxa kale oo laga yaabaa inaan la wadaagno macluumaadka gaarka ah dhinacyo kale oo saddexaad, sida soo socota:

- **Bartilmaadmeedyada u-doodista.** Si loo suurtageliyo u-doodista, abaabulidda, iyo dacwooyinka waxtarka leh, waxaa laga yaabaa inaan isticmaalno codsiyo iyo ficilo kale oo fariin ah si aan u muujino cabbirkeena iyo xooggayaga wadajirka ah sida ka u-doodayaasha iyo abaabulayaasha ACLU of Minnesota ahaan si loo dhiirrigeliyo isbeddelka. Marka la ururinayo saxiixyada codsiga ama fududaynta ficilada kale ee fariinta, waxa laga yaabaa inaan la wadaagno macluumaadka shakhsiyeed bartilmaameedyada u-doodista (sida fariimaha loo diraayo xubinkaada kugu metela aqalka Congresska).

- **Meesha Aad Codsato ama Aad Oggolaato (ay ku jiraan U Shaacinta Dadweynaha) ama Lagama Maarmaanka u ah In La Fuliyo Codsigaaga.**
- **Marka Loogu Baahan Yahay Sharci Ahaanta ama Lama Huraanta u tahay in La ilaaliyo** ACLU of Minnesota **ama Kuwa Kale**. Waxaa laga yaabaa inaan u siino macluumaadka shakhsiyeed ee ka socda ama kugu saabsan qolo saddexaad xaaladahan soo socda awgood:
    - Si aan ugu hoggaansano sharciga lagu dabaqi karo ama looga jawaabo habraaca sharci ansax ah, oo ay ku jiraan kuwa fulinta sharciga ama wakaaladaha kale ee dawladda;
    - Si loogu qabto dacwo, ay ku jirto in macluumaadka loo sii daayo qareenada wadajira ama la taliyayaasha ACLU of Minnesota ama dhinacyada kale ee ku lug leh habka dacwadaha ee sheegashada ama ka dhanka ah ACLU of Minnesota;
    - Haddii ay dhacdo duruufo qaali ah, si looga hortago khasaare nafeed ama dhaawac halis ah ama si loo ilaaliyo badbaadada shakhsi ahaaneed ee shaqaalaha ACLU of Minnesota, isticmaalayaasha Adeegyada Dhijitaalka ah ama adeegyada kale ee ACLU of Minnesota, booqdayaashayada, ama dadweynaha;
    - Si loo ogaado, loo baaro, looga hortago ama si kale wax looga qabto arrimaha khayaanada ama qarsoodinimada;
    - Si aan u hawlgalno oo aan u ilaalino amniga adeegyadayada, oo ay ku jiraan ogaanshaha, baarista, kahortagga, joojinta, ama dib u hagaajinta weerarka lagu soo qaado nidaamyadayada kombayutarka ama shabakadaha; ama
    - Si aan u ilaalino xuquuqda ama hantida nafteena, Ururada nagu xidhan, ama kuwa kale, oo ay ku jirto fulinta heshiisyadayada, shuruudaha, iyo siyaasadahayaga.

ACLU of Minnesota waxay u aragtaa sirta shakhsiga ah iyo xad-dhaafka gaadhideed ee dawlada inay yihiin arrimo ka dhan xorriyadda madaniga ah oo halis ah. Haddii sharciga uu naga rabo ama uu jiro hab sharci oo nalaga rabo inaan macluumaadkaaga la wadaagno hay'adaha dawladda, fulinta sharciga, ama qolo kale oo saddexaad (tusaale, dacwoodayaasha ama eedaysanayaasha ka qeybqaadanaya tallaabo sharci), waxaanu diidi doonaa dalabaadka sharciga ah ee dhinaca saddexaad ee ku aadan helitaanka macluumaadkaaga oo aan aaminsanahay inay khaldan tahay. Xaaladahaas, haddii la go'aamiyo in sharcigu nooga baahan yahay inaan siideyno xogtaada, waxaan isku dayi doonaa inaan sidaas ku sameyno si qarsoodi ah iyo, ilaa iyo inta si sharci ah naloo oggol yahay inaan sidaas yeelno, waxaan sidoo kale isku dayi doonaa inaan ku siino ogeysiiska codsiga hab kasta oo macquul ah oo macquul ah kahor inta aan la bixin shaacinta si aan ku siin fursad aad ku diido siideynta. Ma bixin doonno ogaysiis noocaas ah, si kastaba ha ahaatee, haddii siidaynta ay waafaqsan tahay waajibaadka warbixinta dawladda ee joogtada ah, sida shaacinta maaliyadeed ee looga baahan yahay u hoggaansanaanta sharciga cashuuraha.

# Xulashooyinkaaga iyo Xuquuqdaada

ACLU of Minnesota waxeey ku siineysaa adiga dhawr xulasho oo la xidhiidha macluumaadkaaga shakhsiyeed. Intaa waxaa dheer, waxaa laga yaabaa inaad xaq sharci ah u leedahay xulashooyinkan iyadoo ku xiran xukunkaaga.

## Doorbiditaanada Isgaadhsiinta

Waxaan ku dadaaleynaa inaan kuula xiriirno sida aad doorbideyso.

Xaaladaha qaarkood, waxaad si toos ah u cusbooneysiin kartaa dookhyadaada isgaarsiineed adigoo isticmaalaya kanaalada isgaarsiineed ee aan kaala soo xiriirno, tusaale ahaan, adigoo qoraal u diraya ama ugu jawaabaya "STOP" si aad isaga baxdo rukumashada helidda fariimaha qoraalka ah ee soo noqnoqda

ee ka imaada 82623 ama adigoo gujinaya linkiga "Unsubscribe" ee ku qoran qeybta hoose ee iimayladayada.

Xaaladaha kale, waxaad u baahan doontaa inaad nala soo xidhiidho si aad u cusboonaysiiso doorbiditaanadaada isgaadhsiinta. Si aad u cusboonaysiiso taleefankaaga iyo doorbiditaanadaada isgaadhsiinta tooska ah ee boostada sida ugu fudud ee suurtogalka ah, waxaanu bixinay saddex qaab:

1. **Lagu taliyay: Foomka mareegta ee Doorbiditaanada Isgaadhsiinta** Waxaan kugula talineynaa inaad soo gudbiso dookhyadaada teleefan iyo boostada adigoo isticmaalaya keena ah foomka mareegta ee Doorbiditaanada Isgaarsiinta si loo dedejiyo habaynta.
2. **Iimaylka.** Iimayl u dir: ACLUpreferences@ACLU.org.
3. **Boostada.** U dir warqad Waaxda Xubinnimada ACLU, 125 Broad Street, Dabaqa 18-aad, New York, NY 10004.

## Ikhtiyaarada Xogta

**Ikhtiyaarada Xogtaada.**

ACLU of Minnesota waxeey ku siineysaa dhawr doorasho oo la xidhiidha macluumaadkaaga shakhsiyeed. Xulashooyinkan waxa laguu soo bandhigi karaa sida xuquuqda mawduuca xogta uu u baahan yahay sharciga lagu dabaqi karo. Xuquuqda mawduuca xogta ee sharcigu dejiyey way kala duwanaan kartaa iyadoo ku xidhan gobolka ama dhulka Maraykanka ee aad ku nooshahay waxaana laga yaabaa inay hoos yimaadaan xaddidaad sharci. Xulashooyinka ay ACLU of Minnesota bixiso waxaa ka mid ah:

1. **Ka bixidda:** Waxaad haysataa xulashada ah ah inaad ka baxdo noocyada hawlaha habaynta xogta qaarkood.
    - **Xayeeysiinta Bartilmaameedsan:** Waxaad haysataa ikhtiyaarka ah inaad ka baxdo xayaysiimaha dadka lala beegsado. Marka la eego macnaha ACLU of Minnesota , xayaysiinta dadka lala beegsado waxaa loola jeedaa hab-dhaqankayaga wadaaga macluumaadkaaga shakhsiyeed xayaysiiyeyaasha qolo saddexaad si ay kuugu bartilmaameedsadaan xayaysiisyada adiga.
    - **Iibinta Xogta.** Waxaad leedahay ikhtiyaarka inaad isaga baxdo iibinta xogta. Gudaha nuxurka macneed ee ACLU of Minnesota, waxaanu ku beddelannaa macluumaadka gaarka ah ee deeq bixiyayaasha hay'adaha kale ee aan xisbiga ka tirsaneyn iyo iibiyeyaasha xogta ee iskaashatada aan faa'iido doonka ahayn. Markaad ka baxdo iibinta xogta, waxaa lagaa saarayaa labada hab-dhaqanba.

    Xusuusnaw: Qaar ka mid ah sharciyada qarsoodinimada ee macmiilka ayaa sidoo kale siinaya deganayaasha xaqa ay u leeyihiin inay ka baxaan xog-ururinta ama go'aan gaarista tooska ah kuwaas oo leh saameyn sharci ama saameyn sare oo la mid ah. ACLU of Minnesota ma sameyso hawlahan.

2. **Dib u eegista iyo sixidda waxa aanu heyno:** Waxaad haysataa ikhtiyaarka ah inaad dib u eegto oo aad saxdo macluumaadka gaarka ah ee aan kaa hayno, iyo inaad dib u eegto liiska qolooyinka saddexaad ee aan u wareejinay macluumaadkaaga shakhsiyeed. Waa inaan tixgelinnaa danaha kuwa kale, markaa tani maahan xuquuq buuxda. Haddii uu oggolaado sharciga lagu dabaqi karo, waxa laga yaabaa in aanu ku dalacno khidmo macquul ah haddii codsigaagu yahay mid aan sal lahayn, soo noqnoqda, ama xad dhaaf ah. Haddi aan go'aamino in codsigaagu uu damaanad qaadayo khidmad, waxaanu ku ogaysiin doonaa kharashka oo aanu kuu sharaxi doonaa go'aanka kahor inta aanad buuxin codsigaaga.

- **Codso warbixinta xogtaada.** Waxaad haysataa ikhtiyaar aad ku codsato marin u helka macluumaadkaaga shakhsiyeed. Tan waxa ku jira macluumaadka shakhsiyeed ee aanu ururinay oo aanu maareynay.
- **Codso soo bixinta xogtaada.** Waxaad haysataa ikhtiyaarka inaad ku hesho macluumaadkaaga khaaska ah hab qaabeysan, inta badan la isticmaalo, iyo qaab uu akhriyi karo mashiinka, waxaana laga yaabaa inaad xaq u leedahay inaad xogtaas u gudbiso cid kale.
- **Codsiga in la saxo.** Waxaad haysataa ikhtiyaar aad ku codsato inaan saxno macluumaadka shakhsiyeed ee khaldan ama aan dhammaystirnayn ee adiga kugu saabsan.
- **Codso helista warbixinta u wareejinta xogta qolo saddexaad.** Waxaad haysataa doorashada inaad codsato helitaanka liiska qolooyinka saddexaad - kuwaas oo aanay ku jirin ururradayada ACLU ee xidhiidhka la leh iyo bixiyeyaasha adeegga - kuwaas oo ACLU of Minnesota ay u wareejisay macluumaadka shakhsiyeed.

3. **Tirtiridda waxa aan hayno:** Waxaad haysataa ikhtiyaarka inaad codsato inaan tirtirno macluumaadka gaarka ah ee aan adiga kaa hayno, marka laga reebo macluumaadka loo baahan yahay ama la oggol yahay in lagu hayo si waafaqsan sharciga iyo waajibaadka ku dabaqma. Haddii macluumaadka gaarka ah aan la tirtiri karin, waan ku ogeysiin doonaa marka codsigaaga la dhammaystiro.

   Xusuusnaw: Haddii aad doorato inaad ka tirtirto macluumaadkaaga khaaska ah nidaamyadayada, xubinnimadaada, lacag deeqiddaada, u-doodistaada, iyo taariikhda isxilqaamistaada ee kaala dhexeeya Ururada ACLU ayaa loo tirtiri doonaa si aan soo celis lahayn. Tani waxay sidoo kale kaa saari doontaa helidda dhammaan Isgaadhsiinta ka socda Ururada ACLU oo waxay tirtiri doontaa lacag-deeqitaanada soo noqnoqda. Waxa laga yaabaa inaad dib u rukumato helidda isgaadhsiinada ACLU of Minnesota wakhti kasta, laakiin samaynta sidaas dib uma soo celinayso taariikhdaadi hore ee aad la lahayd Ururada ACLU.

**Soo gudbi Codsiga Dookha Xogta**

Waxaad noo soo gudbin kartaa codsiga dookha xogta adoo isticmaalaya hababka hoose. Si loogu yagleelo soo gudbinta Codsiyada Dookha Xogta sida ugu fudud ee suurtogalka ah, waxaanu bixinay hababka soo socda:

1. **Lagu taliyay: Foomka mareegta ee Ikhtiyaarada Xogtaada.** Waxaan kugula talineynaa inaad ku soo gudbiso codsigaaga dookha xogta adigoo isticmaalaya [foomka mareegta ee Xulashooyinka Xogta ee isbedbeddela]() si loo dedejiyo habaynta.
2. **Iimaylka.** Waxaa laga yaabaa inaad soo gudbiso codsi ka-baxidda xayaysiiska dadka lala beegsado ah ama iibinta xogta adoo iimayl u soo diraya privacy@aclu.org.
3. **Taleefoonka.** Waxaad codsan kartaa warbixinta xogtaada, codsan kartaa soo bixinta xogtaada, codsan kartaa in la saxo xogtaada, codsan kartaa warbixinta wareejinta xogta, ama waxaad codsan kartaa inaan tirtirno xogtaada adoo wacaya nambarkayaga bilaashka ah ee (888) 597-4269. Fadlan xaqiiji inaad si cad u qeexdo magacaaga, cinwaanka iimaylkaaga, lambarka taleefankaaga, iyo nooca codsiga. Hadii adeegayagii qoraal ka dhigista codka aanu si sax ah u qaban codsigaaga, waxa laga yaabaa inaan u baahanahay inaan kula socono si aan u xaqiijino nooca codsiga kahor inta aanan bilaabin habaynta codsigaaga.
4. **Calaamadaha Doorbiditaanka Ka-bixida.** ACLU of Minnesota waxay aqoonsanaysaa oo ay ixtiraameysaa calaamadaha doorbida ka bixida ee buuxiya shuruudaha sharciga qaarkood, sida [Xakameynta Qarsoodinimada ee Caalamiga ah (Global Privacy Control, GPC)](), sida codsiga ka bixitaanka ee isticmaale ee xayeysiiska dadka lala beegsaday iyo iibinta xogta marka aan ku xidhi karno calaamada ka bixidda shaqsiga. Tusaale ahaan, haddii aad booqato mareegteena iyada oo

GPC uu kuu daaran yahay oo aadna lacag deeqdo, ACLU of Minnesota waxay ogaan kartaa oo sharfi kartaa codsigaaga ka bixista ee xayaysiiska dadka lala beegsaday iyo iibinta xogta oo garab socota deeqdaada lacageed. ACLU of Minnesota uma isticmaasho macluumaadka aan sida toos ah uga ururinno baarawsarkaaga, aaladdaada, ama la falgalkaaga Adeegyadeena Dhijitaalka ah si aan ugu isticmaalno xayaysiiska dadka lala beegsado ama iibinta xogta.

Waxa kale oo aad u oggolaan kartaa in qolo kale ay kuu soo gudbiso codsi ka bixitaan ah oo ku saabsan xayeysiiska dadka lala beegsado iyo/ama iibinta xogta ama codsiga tirtiridda iyagoo ku hadleya magacaaga oona iimayl u soo diraya Privacy@aclu.org.

Qoraalo dheeraad ah oo ku saabsan sameynta Codsiyada Ikhtiyaarka Xogta:

- **Xaqiijinta Aqoonsiga.** Marka adiga ama wakiilka idman ee magacaaga ku hadlaya aad sameysaan codsi, waxaan xaqiijin doonaa aqoonsigaaga. Waxaa laga yaabaa inaan kula soo xiriirno si aan kaaga helno macluumaad dheeri ah si aan u xaqiijino aqoonsigaaga wixii ka baxsan waxa ku jira codsigaagii hore. Macluumaadka loo soo uruuriyay si loo xaqiijiyo aqoonsigaaga waligeed looma isticmaali doono ujeedo kale oo aan ahayn in lagu xaqiijiyo aqoonsigaaga si loo fuliyo codsigaaga. Si loo ilaaliyo sirta iyo sinnaanta dheeraadka ah, waxaa naga go'an inaanan isticmaalin sawir-qaadista faraha, lambarada soshal sekuritiga, ama macluumaadka xafiiska deynta ganacsiga taasoo qayb ka ah habka xaqiijinta aqoonsiga.
- **Carruurta.** Haddii aad ka yar tahay 13, ma doonayno macluumaadkaaga shakhsiyeed, mana aha inaad na siiso. Haddii aad tahay waalid ama mas'uul oo aad aaminsan tahay in ilmahaaga ka yar 13 uu na siiyay macluumaadka shakhsiyeed, fadlan nala soo xiriir si macluumaadka ilmahaaga meesha looga saaro.
- **Racfaanada.** Haddii aad jeclaan lahayd inaad samayso rafcaan la xidhiidha Codsiga Ikhtiyaarka Xogta, waxaad samayn kartaa adiga oo iimaylka ugu soo diraya Privacy@aclu.org.

## Ka Maree Asturnaantaada Onlaynka

Intarneetku ma'ahan goob khaas ah. Markaad booqato mareegaha, adeegsato goobaha wax raadinta, oo aadna wax raadin ku sameyso interneetka, shirkado iyo ururo badan oo kala duwan ayaa ururinaya macluumaadka ku saabsan habdhaqankaaga internetka, oo ay ku jiraan raadintaada, booqashooyinkaaga, iyo wax kala iibsigaaga, ka dibna waxeey barbar dhigayaan xogtaas macluumaadka kale ee adiga kugu saabsan ama waxeey ka faa'iidaystaan algorithmiga si loo saadaaliyo hab-dhaqankaaga. Waxa jira waxyaabo aad samayn karto si aad uga ilaaliso in macluumaadkaaga la ururiyo. Waxaan kugu dhiirigelinaynaa inaad akhrido boostigeena warbixinta soo dhigista Tallaabooyinka Fudud ee Qof kastaa Qaadi karo Si Uu U Ilaaliyo Qarsoonidaada Dhijitaal si ay kaaga caawiso inaad ilaaliso qarsoodinimadaada onlaynka.

Sida ka dhacda mareegaha intooda badan, mareegahayagu waxay soo ururiyaan oo habeeyaan macluumaad kala duwan oo ku saabsan booqdeyaashooda si ay awood ugu yeeshaan shaqaynta iyo inay bixiyaan adeegyada la codsaday. Marka laga soo tago macluumaadka aan sida tooska ah ugu soo ururino ujeeddooyinkeena (eeg Macluumaadka Shakhsi ahaaneed ee Aan Sida Tooska ah U Soo Uruurinno), Adeegyadeena Dhijitaalka ah waxaa ka mid ah linkiyada ku geenaya bogaggeena baraha bulshada, linkiyada ku geynaya mareegaha kale ee ay maamulaan qolo saddexaad (tusaale, bogga iska-diiwaangelinta dhacdo u-dooditaaneed ee urur kale oo aan macaash doon ahayn, habeeyaha lacag-bixinta oo qolo saddexaad ah), warbaahinta lasoo dhexgeliyay (tusaale, muuqaalada YouTube), iyo codsiyada lasoo dhexgeliyay ee ka socda qolooyinka seddexaad ee laga yaabo iney uruuriyaan xog kugu saabsan adiga marka aad doorato inaad la falgasho iyaga. Markaad marin u hesho macluumaadkan, waxaad si toos ah ula falgaleysaa qolooyin saddexaad, kuwaas oo xog ururintooda iyo hawlqabadkooda habayntu ay

maamulaan siyaasadahooda gaarka ah, ee uusan maamulin Bayaankan. Markaad eegto warbaahinta lasoo dhexgeliyay linkiga ama aad la falgasho codsiyada qolo saddexaad ee lasoo dhexligeliyay linkiga — lagu marti-galiyo madalada kale, laakiin lagu eegi karo badhamada aanu bixinay — waxaad ku sii jiri doontaa mareegahayaga laakiin waxaad la falgeli doontaa bey'ada interneedeed ee qolooyinka saddexaad. Xaaladahan, waxaanu caddaynaynaa inaad eegayso nuxur dibadda ka socda markaad gujiso badhamada.

**Sida Looga Dhigo Mid Aan Shaqeyneynin Xog Keydiyayaasha**

Haddii aad jeclaan lahayd inaad hoos u dhigto xogta ay mareegtu kaa soo aruurisay ee adiga kugu saabsan markaad baadhayso interneedka, waxaad nadiifin kartaa oo aad iska xidhi kartaa xog keydiyayaasha gudaha baarawsarkaaga.

Wacyigelintaada awgeed, mareegaheenu wali way shaqayn doonaan haddii aad ka dhigtid xog keydiyayaasha gudaha baarawsarkaaga kuwa aan shaqeeneynin. Fadlan ogow in damminta xog keydiyayaasha ee baarawsarkaaga ay saameyn ku yeelan karto shaqada mareegaha kale ee aad booqato oo daminta xog keydiyayaashuna aysan damin doonin tignoolajiyadaha kale (sida sawirada yaryar, faylasha cad ee sawirada ee yaryar, iyo faylasha sawirada yaryar ee halka-pixel ah), halkaas oo ACLU of Minnesota u adeegsado mareegaheena si ay u taageerto hawlgalladeena iyo amniga mareegaheena.

# Wax ku saabsan Bayaankan

## Goorma Ayuu Ku Dabaqmaa Bayaankan

Bayaankani waxa uu qeexayaa sida aanu ula dhaqano macluumaadka shakhsiyeed ee ay ku soo uruurisay ACLU of Minnesota hawlaheena guud. Tan waxaa ku jira macluumaadka shakhsiyeed ee laga soo aruuriyay onlaynka iyo ofleenkaba, oo ay ku jiraan iyada oo loo sii marayo mareegteena ugu weyn, aclu-mn.org, oo uu maamulo Ururku laakiin ay martigeliso macluumaadka Foundation, iyo mareegaha kale ee ACLU of Minnesota iyo Adeegyada Dhijitaal ah ee ku xidhan Bayaankan.

Barnaamijyada qaarkood ee ACLU of Minnesota, iyo sidoo kale Ururada xulafada ACLU ee ACLU of Minnesota, waxeey leeyihiin bayaano qarsoodinimeed oo gooni ah. Marka bayaan gaar ah oo ka duwan kan uu ku dabaqmo, bayaanka qarsoodinimada ee khuseeya ayaa la soo dhajin doonaa. Si aad u aragto liis dhammeystiran oo ku saabsan bayaanada qarsoodinimada ee Ururada ACLU, akhri [Bayaanada Qarsoodiga ah ee Ururada ACLU].

## Qeexitaannada

"Ikhtiyaarada Xogta" macnaheedu waa ikhtiyaarada aad leedahay ee la xiriira macluumaadkaaga shakhsi ahaaneed. Ikhtiyaaradani waxa laguugu soo bandhigi karaa sida xuquuqaha ku xidhan xogta ee uu sharcigu u baahan yahay.

"Macluumaad shakhsi ahaaneed" macneheedu waa macluumaadka lagu aqoonsan karo, la xidhiidha, qeexaya, ama si macquul ah loogu xidhiidhin karo, si toos ah ama si dadbanba, qof bini'aadam ah oo gaar ah, hab shakhsi ahaaneed. Kuma jiraan macluumaadka loo arko in laga saaray waxyaabaha qofka lagu aqoonsan karo, qarsoodi ah, ama la isugu daray si waafaqsan sharciga khuseeya ama macluumaadka la xidhiidha qofka awoodihiisa shaqo ama xirfadeed, oo ay ku jiraan macluumaadka laga helay ama ku saabsan shaqaalaha ACLU of Minnesota ama codsadayaasha shaqo ee doonaya inay ka shaqeeyaan ACLU of Minnesota.

"Habaynta" macluumaadka shakhsiyeed macneheedu waa hawlgal kasta, ama hawlgallo, oo lagu sameeyo gacanta ama si otomaatig ah macluumaadka shakhsiyeed, sida soo ururinta, isticmaalka, abaabulida,

qaabaynta, kaydinta, gudbinta, falanqaynta, soo bixinta, tirtirida, ama wax ka beddelka macluumaadka shakhsi ahaaneed.

## Habraaca Cusbooneysiinta Bayaanka

Bayaankeenu waa mid u taagan in wax laga beddeli karo mustaqbalka. Waxaanu halkan ku soo dhejin doonaa noocyada la cusboonaysiiyay ee Bayaankan, haddii isbedeladu ay yihiin kuwo muhiim ah, waxaanu ku siin doonaa ogaysiis muhiim ah oo ku saabsan isbedellada gudaha mareegteena.

## Su'aalaha ku saabsan Bayaankan

Haddii aad hayso wax su'aalo ah oo ku saabsan Bayaanka Asturnaanta ama hab-dhaqanada qarsoodinimadeena iyo maamulideena xogta, waxaad kala xidhiidhi kartaa kooxdayada Qarsoodinimada iyo Maareynta Xogta adigoo iimayl u diraaya Privacy@aclu.org.